

## Final apprehended domestic violence order *Crimes (Domestic and Personal Violence) Act 2007*

Dukumiintigan ma aha dukumiinti sharciyeed. Waxaa looga danleeyahay inuu kaa caawiyo inaad fahanto amarka maxkamada.

Waa inaad raacdo amarada maxkamada iyo kuwa booliska. Waa fal danbiyeed inaad raacin amarada maxkamada iyo kuwa booliska.

**Waxaa waajiba inaad raacdo awaamiirta hoose. Waxay ka soo horjeeda sharciga in aadan raacin amaradaan. Waxaa ku xiri kara booliiska, dacwooyina kugusoo oogi kara, kuna geyn kara maxkamada. Haddii ay dembi kugu hesho maxkamadu, waxaa lagu diri karaa xabsiga muddo laba sano ah waxaana lagu ganaaxi karaa ilaa \$5,500.**

**Waxaa kaloo lagu soo eedayn karaa laguguna geyn karaa maxkamada falal danbiyeedyo kale. Haddii ay maxkamadu kugu hesho dembiyadaas, waxaad mutaysan kartaa ciqaab intaas ka badan.**

Waxaa waajib kugu ah inaad raacdo amaradaan ilaa taariikhda la xusay.

Amarada waxaa loo sameyey in lagu xafido dadka ku xusan.

Waxaa waajiba inaad raacdo amaradaan xataa haddii qofka la xafidayaa aanu doonayn ama kuu sheego in aadan samayn. Haddii aad isku daydo inaad samayso kuwaan hoos ku xusan midkood, waxay weli ka soo horjeeda sharciga loogu yeero "jebinta amarka".

### Amarada ku saabsan dabecada

1. Waxaa waajiba in aadan mid ka mid ah waxyaalaha soosocda ku samayn dadka la amaangeliyey, ama qof kasta oo ka mid ah kuwa guriga la degan oo ay xiriir leeyihiin:
  - A) Weerar ama handadaad,
  - B) Daba gal, dhibto ama cabsi galiso, iyo
  - C) Inaad si ula kac ah oo taxadar la'aan ah u burburiso ama wax u yeesho alaab uu leeyahay ama uu hayo qofka la amaangeliyey

#### Tusaale:

- Waxaa waajiba in aadan samayn waxyaalaha shakhsiyan, adoo cidkale u maraya, ama adoo isticmaalya elektaroonig iyo aalada kale (sida telefoon, fariimaha qoran, emails, Facebook ama warbaahin kale oo bulsho ama ku dabagelida GPS).
- Waxaa waajiba in aadan samayn ama oran wax qofka la amaangeliyey dareensiin kara cabsi, ama dareensiin kara in laga yaabo inaad wax yeesho ama wax gaarsiiso wuxuu leeyahay sinaba, sida wax la wada leeyahay oo ay mid yihiin alaabta ama xayaawaamadka guryaha lagu haysto sida Eyga ama bisada.



## Final apprehended domestic violence order *Crimes (Domestic and Personal Violence) Act 2007*

Dukumiintigan ma aha dukumiinti sharciyeed. Waxaa looga danleeyahay inuu kaa caawiyo inaad fahanto amarka maxkamada.

Waa inaad raacdo amarada maxkamada iyo kuwa booliska. Waa fal danbiyeed inaad raacin amarada maxkamada iyo kuwa booliska.

### Amarada ku saabsan la xiriirida

2. Waxaa waajiba in aadan doonan qofka la amaangeliyey ama aadan sinaba ula xiriirin, haddii aadan u marayn garyaqaan.

Tusaale ahaan:

- Waxaa waajiba in aadan doonan ama la xiriirin qof la amaangeliyey shakhsi ahaan ama adoo kula xiriiraya elektaroonig iyo aalada kale (tusaale ahaan telefoon, fariimaha qoran, emails, Facebook ama warbaahin kale oo bulsho ama ku dabagelida GPS), ama hab kale oo kasta, sida inaad qof kale codsato inuu kuula hadlo.
- Haddii qofka la amaangeliyey kula soo xiriiro, aadna ka jawaabto, iyada oo aan ku xirnayn inta jeer oo uu kula soo xiriiray ama sababta uu sidaas u samaynayo, waxaad jebinaysaa amarkan.

3. Waxaa waajib ah in aadan tegin:

- A) Dugsiga ama meel kale oo kasta oo qofka la amaangeliyey u joogo waxbrasho,
- B) Meel kasta oo qofku u joogo daryeel ilmood, ama
- C) Meel kale oo kasta oo lagu xusay amarka maxkamada.

Tusaale:

- Waxaa waajiba in aadan tegin meelahaas shakhsi ahaan,
- Taas macneheedu waxay kaloo noqon kartaa ma tegi karto xafladaha dugsiga, munaasabada gaarka ah ama kulanada waalidiinta iyo macalimiinta ee habeenkii ka dhaca dugsiga.

4. Waxaa waajiba in aadan u tegi karin ama raaci karin qofka la amaangeliyey ugu yaraan 12 saacadood ka dib markaad cabtay khamro ama qaadatay daroogada reeban.

Tusaale:

- Waxaa waajib ah in aadan u tegin qof la amaangeliyey ugu yaraan 12 saacadood ka dib markaad cabtay khamro ama qaadatay daroogada reeban. Tusaale ahaan, haddii aad cabtay khamro 9ka fiidkii, uguma tegi kartid gurigooda ama shaqadooda ilaa laga gaaro 9ka subaxii maalinta soo socota. Haddii aad wada nooshihiin, taas macneheedu waxa weeye waa inaad heshaa meel kale oo aad joogto ilaa 12 saacadood.
- Waxaa waajiba in aadan la cabin khamro ama la qaadan daroogada reeban qofka la amaangeliyey
- Waa inaad ka fogaataa xataa haddii qofku yiraahdo ha iga fogaan.



## Final apprehended domestic violence order *Crimes (Domestic and Personal Violence) Act 2007*

Dukumiintigan ma aha dukumiinti sharciyeed. Waxaa looga danleeyahay inuu kaa caawiyo inaad fahanto amarka maxkamada.

Waa inaad raacdo amarada maxkamada iyo kuwa booliska. Waa fal danbiyeed inaad raacin amarada maxkamada iyo kuwa booliska.

5. Waxaa waajiba in aadan isku deyin inaad hesho qofka la amaangeliyey marka laga saaro sida maxkamadu amartay.

Tusaale:

- Waa in aadan isku deyin inaad ka hesho qofka la amaangeliyey habka wada xiriirka elektarooniga (tusaale ahaan, adiga oo wacaya, telefoon u diraya, farrin qoran u diraya, ama Facebook ama hab kale oo warbaahinta bulshada), internetka ama weydiinaya dad kale haddii ay ogyihiin meesha uu joogo qofkaasi.

### Amarada Xeerka qoyska ama waalidnimada

6. Waa in aadan u tegin qofka la amaangeliyey ama la xiriirin sinaba, haddii wada xiriirku aanu ahayn:

- A) inaad u maro garyaqaan, ama
- B) inaad tagto talabixin, dhexdhexaadin iyo/ama dib-u-heshiisiin la aqoonsan yahay ah oo maxkamadu ansixisay, ama
- C) sida ay amartay maxkamadaani ama maxkamad kaleeto wixii la xiriira ilmaha, ama
- D) sida lagu ogolaaday qoraalka u dhexeeya adiga iyo waalid/diinta wixii ku saabsan ilmaha, ama
- E) sida lagu ogolaaday qoraalka u dhexeeya adiga iyo waalidka/waalidiin iyo qofka ay saaran tahay masuuliyada waalid/waalidiin wixii ku saabsan la xiriirida waalidiinta,

Tusaale:

- Waxaa waajib kugu ah in aadan u tegin ama la xiriirin qofka la amaangeliyey shakhsi ahaan ama hab elektaroonig ah (tusaale ahaan, telefoon, farrin qoran, emails, ama Facebook ama hab kale oo ah warbaahinta bulshada) ama si kasta oo kale, sida weydiisashada qof kale inuu la xiriiro iyaga.
- Haddii qofka la amaangeliyey kula soo xiriiro, aadna ka jawaabto, iyada oo aan ku xirnayn inta jeer ee qofkaasi ku wacay ama sababta uu sidaas u samaynayo, waxaad jebinaysaa amarkan waxaana lagu horgeyn karaa maxkamada.
- Haddii aad haysato amarka maxkamada qoyska ama amar kale oo kasta oo la xiriira daryeelka ilmaha, waxaad la xiriiraysaa garyaqaankaaga haddii aad wax shaki ah ka qabto waxaad awoodi karto iyo waxa aadan awoodi karin.

**(B-da):** Arrimaha sharciga qoyska, la aqoonsan yahay macneheedu waxa weeye waa la aqoonsan yahay sida ku xusan Sharciga Xeerka Qoyska ee 1975.



## Final apprehended domestic violence order *Crimes (Domestic and Personal Violence) Act 2007*

Dukumiintigan ma aha dukumiinti sharciyeed. Waxaa looga danleeyahay inuu kaa caawiyo inaad fahanto amarka maxkamada.

Waa inaad raacdo amarada maxkamada iyo kuwa booliska. Waa fal danbiyeed inaad raacin amarada maxkamada iyo kuwa booliska.

**(E-da):** Tusaale ahaan, haddii adiga iyo qofka la amaangeliyey aad carruur dhasheen laakiin qofka kale leeyahay masuuliyada waalidnimada ilmahiina, waa inaad markaas heshaan ogolaanshahooda oo qoran wixii la xiriira ilmaha. Qofka kale wuxuu noqon karaa wakiilka Wasiirka Adeega Bulshada iyo Qoyska, masuul sharciyeed oo lagu magacaabay amarka maxkamada ama waalid korsanaya.

### Amarada ku saabsan meelah aadan aadi karin

7. Waa in aadin ku noolayn:

- A) Isla cinwaan qofka la amaangeliyey, ama
- B) Meel kasta oo lagu xusay amarka.

Tusaale:

- Haddii aad ku noolayd cinwaakaan aadna u baahan tahay inaad ka qaadato alaabtaadii, waxaad ka dalban kartaa maxkamada Amar aad ku hesho alaabtaadii, kaas oo loogu yeero Amarka Dib-u-helida Alaabtaadii ama waxaad la xiriiri kartaa booliis.

8. Waa in aadan aadin:

- A) Meel kasta oo qofka la amaangelinayaa ku nool yahay, ama
- B) Meel kasta oo qofkaasi ka shaqeeyo, ama
- C) Meel kasta oo amarka ku qoran.

Tusaale:

- Laguuma ogola inaad aado xuduudaha goobahaas.
- Haddii aad ku noolayd cinwaankaan aadna u baahan tahay alaabtaadii, waxaad ka dalban kartaa maxkamada Amarka Dib-u-helida Alaabtaadii ama waxaad la xiriiri kartaa booliis.

9. Waxaa waajiba in aadan dhaafin inta mitir oo lagu xusay amarka:

- A) Meel kasta oo qofka la amaangeliyey ku nool yahay, ama
- B) Meel kasta oo ay ka shaqeeyaan, ama
- C) Meel kasta oo ku jirta liiska amarka.

Tusaale:

- Laguuma ogola inaad dhaafto 100 mitir xadka goobahaas.



## Final apprehended domestic violence order *Crimes (Domestic and Personal Violence) Act 2007*

Dukumiintigan ma aha dukumiinti sharciyeed. Waxaa looga danleeyahay inuu kaa caawiyo inaad fahanto amarka maxkamada.

Waa inaad raacdo amarada maxkamada iyo kuwa booliska. Waa fal danbiyeed inaad raacin amarada maxkamada iyo kuwa booliska.

- Haddii aad ku noolayd cinwaankaan aadna u baahan tahay alaabtaadii, waxaad ka dalban kartaa maxkamada Amarka Dib-u-helida Alaabtaadii ama waxaad la xiriiri kartaa booliis.

### Amarada ku saabsan hubka

10. Waa in aadan haysan wax hub ah noocuu doono ha ahaadee sida lagu sheegay Xeerka mamnuucida Hubka ee 1998.

Tusaale:

- Waa inaad booliiska u dhiibtaa dhamaan hubkaaga iyo wixii lagu dagaalami karo oo aan la ogolayn sida lagu xusay Xeerka Mamnuucida wixii hub ahaan loo isticmaali karo. Waa gaf dembiyeed gaara inaad haysato kaas. Weydii booliiska haddii aadan hubin wixii hub ah oo aanay ahayn inaad haysato.

### Amarada kale

11. Booliiska ama Maxkamada ayaa bixin kara amaro kale oo gaar kuu ah adiga ama qoyskaaga.

**Cilaaqaadka dadka u dhexeeya badankiis kuma jirto cabsi, kantaroolid ama rabshad. Ficiladaada lama aqbali karo. Hadda waxaa lagu siiyey amarkan waxaana waajiba inaad adeecdo. Amarkaani wuxuu ku jiraa kumbuyuutarka booliiska NSW.**

Rabshada gurigu waxay saamaysaa oo waxyeeshaa qof walba. Marka carruurta ay arkaan rabshad guriga ka dhacaysa, waxay u badan tahay inay ka qaadaan niyad-jab, welwel, iyo xanaaq, waxaana laga yaabaa inay dugsiga kala kulmaan dhibaato.

Tani waxay kuu tahay fursad aad ku samayso isbedel.

Haddii aad jeclaan lahayd in aad qof kala hadasho maaraynta dareenkaaga iyo dhibsiga (cadaadiska), waxaa la helli karaa caawimo. Wac:

- **Men's referral service on 1300 766 491** - adeeg rag si ay u hellaan kaalmo
- **Relationships Australia on 1300 364 277** - Adeega Kaalmada Qoyska
- **Parent line on 1300 130 052** - Adeeg lagu kaalmeeyo waalidiinta



## Final apprehended domestic violence order *Crimes (Domestic and Personal Violence) Act 2007*

Dukumiintigan ma aha dukumiinti sharciyeed. Waxaa looga danleeyahay inuu kaa caawiyo inaad fahanto amarka maxkamada.

Waa inaad raacdo amarada maxkamada iyo kuwa booliska. Waa fal danbiyeed inaad raacin amarada maxkamada iyo kuwa booliska.

Haddii aadan raacin waxa amarkani sheegayo:

- Waxaad xabsi geli kartaa ilaa 2 sanadood waxaana lagu ganaaxi karaa \$5,500.
- Waa lagu soo eedayn karaa waxaana lagugu geyn karaa maxkamada gafaf kale oo dembiyeed (tusaale, gacan ka hadal iyo handadaad), iyo weliba jebinta amarkan. Haddii arrintaan darteed maxkamadu kugu hesho dembi gafafkaan dartood, waxaad mudan kartaa ciqaab siyaada ah, sida xabsi muddo dheer ah.

Si dhaqso ah waa inaad ugu qaadaa dhamaan hubka gacanta iyo wax kasta oo lagu dagaalami karo oo aan la ogolayn sida ku xusan liiska Xeerka Mamnuucida Hubka ee 1998, oo ay weheliyaan shatiyada kale booliiska. Haddii aad haysato mid ka mid ah kuwaas, waxaad ku xadgudbaysaa amarkan waxaana lagugu eedayn karaa gafaf dembiyeed kale.

Haddii aad qabto wax su'aalla oo ku saabsan amarada, waxaad la xiriri kartaa:

- Garyaqaan
- Legal Aid NSW tel: (02) 9219 5000
- Rugta Booliiska agtaada ah weydiina Sarkaalka U-qaybsan Rabshada Qoyska (haddii aad tahay qofka la amaangeliyey)
- Law Access NSW tel: 1300 888 529 ama [www.lawaccess.nsw.gov.au](http://www.lawaccess.nsw.gov.au)
- Adeegyada Tarjumida tel: 131 450 ama [www.tisnational.gov.au](http://www.tisnational.gov.au). 

